Punainen Risti

Ururka Laanqayrta Cas ee Finland


IFRC/Bo Mathisen

LA WAAYEY?

CAAWIMO XAGGA WAR KA HAYN LA'AANTA AH BAAFINTA DADKA IYO FARIIMAHA

CAAWIMO XAGGA WAR KA HAYN LA'AANTA AH

Ururuka Laanqayrta Cas waxaa laga helaa caawimo xagga war ka hayn la'aanta ah. Taas oo ah dadka isku qoyska ah ee kala lumay ayuu ururka wuxuu ka caawiyaa siday isu heli lahaayeen oo u wada xiriiri lahaayeen. Laga soo bilaabo ilaa markii ururka la aasaasay, ururkayagu sidaas ayuu u shaqeeyaa.

Meelaha dagaaladu ka jiraan, hawsha waxaa maamula oo hogaamiya Golaha Caalamiga ah ee Ururka Laanqayrta Cas. (ICRC). Goluhu wuxuu sannad walba raadintooda sameeyaa qiyaastii 10 000 qof oo cusub (tracing), wuxuuna gudbiyaa in ka badan 500 000 oo farriimo ah (Red Cross Message).

Dhammaan Ururada Laanqayrta Cas iyo Ururada Bisha Cas (186) ee waddamada adduunka ka jiraa way ka qaybqaataan middaynta qoysaska.

Ururka Laanqayrta Cas ee Finland wuxuu ka mid yahay ururadaas adduunka oo dhan ka jira ee isku xiran. Sannad walba qiyaastii 150 qof ayaannu ka raadinaa in ka badan 30 waddan. Farriimaha aannu sannad walba Finland ka qaadno ee gudbinaa waa qiyaastii 50 fariimood, intaas in le'eg oo fariimo ahna waannu helnaa oo waddamada kale ayaa nalooga soo gudbiyaa.

AMINA WAY HESHAY NINKEEDII IYO CARRUURTEEDII

Amina iyadoo ay la socdaan ninkeeda iyo laba carruur ah oo ay dhaleen ayey ka qaxeen dagaalkii sokeeye ee Afgaanistaan. Safarkooda oo heerar badan ahaa intuu socday ayey qoyskeedii kala hareen. Amina waxay timi Finland, ka dibna waxay sugeysey, in reerkeedu ka daba yimaado, laakiin war kama aanay helin . Dadka ehelka ah ee Afganistan ku harayna ma aanay ogeyn meesha ay Amina ninkeeda iyo carruurteedu joogaan. Amina waxay buuxbuuxisay foomka raadinta dadka ee Ururka Laanqayrta Cas, meelaha foomka loo diray waxaa ka mid ahaa Ururka Bisha Cas ee Pakistaan. Ninkii iyo carruurtii waxaa laga helay Islamabaat.



ICRC/Boris Heger

ICRC/Boris Heger

SIDAN AYAA DADKA LOO RAADIYAA

Qofka la raadinayo raadintiisa waxaa codsan kara qof ehelkiisa ah ama qof waalid ahaan u ah/ qof wakiil ka ah. Qofka wax raadinayaa wuxuu buuxbuuxinayaa foom Ururka Laanqayrta Cas leedahay. Su'aalaha foomka laysku weydiinayo waxaa ka mid ah, macluumaadka shakhsi ahaaneed (magac, dhalasho iwm) ee qofka la raadinayo iyo cinwaankii ugu dambeeyey ee lagu ogaa.

Ururka Laanqayrta Cas ee Finland wuxuu foomka qofka lagu raadinayo u diraa Ururka Laanqayrta Cas ama Ururka Bisha Cas ee waddanka qofka la la' yahay laga raadinayo. Adeeggu waa mid aamminaad leh, macluumaadka shakhsi ahaaneed ee qofka la raadinayana lama siinayo cid aan shaqo ku lahayn. Hase yeeshee waxaa dhici karta, in Ururka Laanqayrta cas ee waddankaasi ay dadka tusaale ahaan ka raadiyaan diwaanadda offishalka ah.

Marka qofkii la raadinayey la helo, qofku isagaa go'aan gaaraya, inuu rabo in Ururka Laanqayrta Cas u gudbiyaan cinwaankiisa dadka ehelkiisa ah iyo in kale.

Xitaa haddii ay dhacdo in aan la helin qofkii la raadinayey, qofka macluumaadkiisa shakhsi ahaaneed waxay ku jirayaan diwaanka Ururka Laanqayrta Cas, markaas haddii wax cusub soo kordhaan, raadintii dib ayaa loo bilaabayaa.

FARIINTA URURKA LAANQAYRTA CAS WAA SIDAN OO KALE

Ururka Laanqayrta Cas wuxuu sidoo kale qoysaska ka caawiyaa, inay wada xiriiraan, marka dagaal ama shil dhacay dartiis boostada caadiga ah iyo tele-foonadu aanay shaqaynayn. Ururkayaga ayaa dadka fariimaha u kala gudbiyaa, ilaa inta isgaarsiintu caadi ka noqonayso.

Fariinta waxaa lagu qoraa foom diyaar ah. Waxyaabaha ay fariintu ka kooban tahayna waxay noqon karaan warar qofka u gaar ah ama wararka qoyska ku saabsan oo sawirro wata. Waxyaabaha siyaasadda ah lama ogola. Sidoo kale fariinta lama raacin karo waxyaabaha ah sida lacagta ama daawooyinka.

Ururka Laanqayrta Cas iyadoo kaashanaysa ururada ay isku xiran yihiin ayey fariimaha sii gudbisaa, oo fariimaha dadkii loo soo diray ayaa ama toos loogu geeyaa ama dadka fariimaha loo hayo magacyadooda waxaa lagu soo dhejiyaa xeryaha qaxootiga ama dadka magacyadooda waxaa lagu soo qoraa joornaallada ama raadiyaha ayaa laga baafiyaa. Haddii qofkii fariintu ku socotey la waayo, Ururka Laanqayrta Cas fariinta qofkii diray ayuu dib ugu soo celiyaa. Foomkana waxaa lagu soo qoraa sababta keentay, in qofkii fariintu ku socotey aan la helin.

MOHAMED WUXUU FARIIN KA HELAY WALAASHIIS

Mohamed wuxuu ka soo cararay xasilooni darada Soomaaliya ka jirtey, wuxuuna yimi Finland oo uu qaxootinimo ka codsaday. Qoyskiisa meel uu kala xiriiro ayuu waayey, ka dib markay askar qabiil kale ah weerar ku soo qaadeen gurigii waalidkiisa. Mohamed wuxuu codsi baafin ah u dirsaday barnaamij raadiyaha dadka laga baafiyo. Barnaamijka waxaa si wadajir ah u sameeya Golaha caalamiga ah ee Ururka Laanqayrta Cas iyo BBC. Mohamed walaashiis barnaamijka raadiyaha ayey magaceeda ka maqashay, ka dibna fariinta Ururka Laanqayrta Cas ayey walaalkeed u soo qortay.

IYADOO LA KAASHANAYO TEKNIKADA WARARKA (Information Technology)

Wakhtiga hadda la joogo Golaha Caalamiga ah ee Ururka Laanqayrta Cas wararka ku saabsan dadka dhibaatooyinku ka soo gaareen dagaalada dhinacyada kala duwan ee adduunka oo uu soo ururiyey ayuu goluhu ku kaydiyaa diwaannada wararka (tietokannat). Diwaannada wararka ee ugu ballaaran waxay ku saabsan yihiin Ruwanda iyo Balkan. Ururada kale ee samafalka bini aadankuna way isticimaali karaa wararka oo dhan.

Goluhu (komitea) sidoo kale si uu u caawiyo midaynta qoysaska, wuxuu sameeyey boggag internet-ka ah (Family Link), iyadoo boggagaas la isticimaalayo ayaa waxaa suuragal ah, in la raadiyo dadka qoyska ka tirsan ee la' yahay. Boggaga qofku wuxuu ku qori karaa meelaha lagala soo xiriiri karo iyo dadka uu raadinayo magacyadooda. Cinwaanka bogga laga helaa waa: www.familylinks.icrc.org.

WAXAA SAL U AH HESHIISYADA CAALAMIGA AH

Shaqada Ururka Laanqayrta Cas ee ah inay meelaha dagaalku ka jiro dadka isku qoyska ah wada xiriiridooda dib u soo celiso, waxay ku salaysan tahay Heshiisyada Jineefa iyo qoraallada dheeraadka ah ee heshiisyadaas. Heshiisyadaas waxyaabaha lagu caddeeyey waxaa ka mid ah:

• Qof walba oo meel iska horimaad ka jiro, qolyaha meesha isku haysta qolo ka mid ah dhinaceeda jooga ama jooga meel la qabsaday, wuxuu xaq u leeyahay, inuu xubnaha qoyskiisa meel kastaba ha joogeene u gudbin karo warar noocoodu yahay kuwo qofka khaas ahaan ugu saabsan, wuxuu kaloo xaq u leeyahay, inuu warar sidaas oo kale ah ka helo dadka qoyskiisa ah. (4. Heshiiska Jineefa 1949, qodobka 25.).

• ... ururada caalamiga ah ee samafalka bini aadanku waa inay marka ugu horaysa qalbiga ku hayaan, xuquuqda qoysasku u leeyihiin, inay ogaadaan sidday dadka ehelkoodu yihiin (I qoraalka dheeraadka ah 1977, qodobka 32)

• Dhinacyada heshiisyada sare iyo dhinacyada iska soo horjeedaa waa inay si walba oo suuragal ah u fududeeyaan in dib loo mideeyo qoysaska dagaalka xabadaha dartiis u kala jajabay, isla markaasna ay si gaar ah u dhiirigeliyaan shaqada ururada samafalka bini aadanka ee shaqada noocan ah samaynaya, una samaynaya si waafaqsan heshiisyada guud iyo sida uu qoraalkan dheeraadka ahi farayo iyo iyadoo la raacayo xadadka nabadgelyada ee dhinac walba oo arrinta ku lug leh. (I qoraalka dheeraadka ah 1977, qodobka 74)

SAMUELI HOOYADII ILAYN WAY NOOLAYD

Samuel oo (9 jir) Angoolaan ah waalidkiis baa ka lumay, ka dib markay isagoo iskuulka ku maqan askartu burburiyeen gurigii reerkiisu deggenaa. Muddo dheer ayuu reerkoodii raadinayey, laakiin ma aanu helin. Samueli waxaa caawiyey oo dagaalka ka soo dhex saaray adeerkiis, markii dambana wuxuu yimi Finland. Isagoo halkan jooga ayuu bilaabay inuu waalidkiis raadiyo. Ururka Laanqayrta Cas ayaa maalin maalmaha ka mid ah helay qof ay Samuel qaraabo fog isu yihiin, oo yiri waxaa dhici karta in Samuel hooyadiis joogto Kanada. Raadinta waxaa lagu wareejiyey Ururka Laanqayrta Cas ee Kanada. Ururkuna markii dambe hooyada way heleen.

ICRC/Thierry Gassmann

Faahfaahin dheeraad ah iyo foomamkaba waxaa laga helaa xafiiska Ururka Laanqayrta Cas iyo internetka.

Xafiiska Dhexe

Helsinki	(09) 12 931

Xafiisyada magaalooyinka

Joensuu	0400 158 390
Jyväskylä	(014) 611 411
Kouvola	(05) 750 0750
Kuopio	0400 158 397
Mikkeli	(015) 151 131
Oulu	(08) 561 8200
Pori	(02) 633 1585
Rovaniemi	(016) 314 425
Seinäjoki	(06) 429 5800
Tampere	(03) 235 5300
Turku	(02) 274 555
Mariehamn	(018) 12 743
Vasa	(06) 317 4549
Åbo	(02) 277 1555

www.redcross.fi/henkilotiedustelu

WAXAAN KU HAWLGALNAA MABAADI'DAN

BINIAADANNIMO
SINNAAN
DHEXDHEXAADNIMO
(SI AAN DHINACNA LA JIRIN)
ISKAA WAX U QABSO
MADAXBANAANNIMO
MIONIMO
CAALAMINNIMO (SI ISKU MID AH CAALAMKA ADDUUNKA OO DHAN)